**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA MAALIYADDA**

# QORSHAHA KA QAYB GALKA DANEEYAYAASHA

## Mashruuca III-aad ee Kharashaadka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed

### Horudhac

**Hawlgelinta Daneeyayaasha**:
Iyadoo la raacayo (Heerarka tayo ee Deegaan iyo Bulsho ee 10-aad ee Bangiga Adduunka: Hawlgelinta Daneeyayaasha iyo Shaacinta Macluumaadka), Amaahiyaha, waxaa looga baahan yahay in uu la yimaado, oo uu fuliyo Qorshaha Ka-qaybgalka Daneeyayaasha, kaasoo qeexaya wakhtiga iyo hababka ka-qeybgalka daneeyayaasha, inta uu socdo mashruuca .

Qiimeynta halista bulsho, waxaa loo arkaa mid la taaban karo, iyadoo la tixgelinayo khatarta iyo saameynta bulsho ee soo socda: (i) bannaan u saaridda ama takooridda kooxaha danyarta ah iyo kuwa nugul marka laga hadlayo shaqo-siinta iyo bixinta adeegga iyo wax walba in ay helaan dadka awoodda leh ee waxaa loo arkaa khatar bulsheed oo saameyn leh; iyo (ii) khatarta baaxadda leh ee la xiriira xiisadda bulsho ee korortay (tusaale ahaan, sida adeegyada loo bixiyo, ama goobta adeegyada); (iii) Khatarta shaqada, oo ay ku jiraan Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada iyo khatarta amniga, dhiig-miirashada iyo xadgudubka galmada, dhibaataynta galmada, iyo noocyada kale ee Tacaddiyada Ku-slaaysan Jinsiga ee ka dhici kara, marka shaqaalaha la qorayo ama marka shaqaalaha shaqada loo sii wadayo gaar ahaan kuwa dumarka ah ee xirfadda leh ama aan xirfadda lahayn iyo bixinta adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada labadaba; (v) Khataraha guud ee ka shaqaynta

aagagga rabshaduhu ka jiraaan iyo xaalad bulsho oo isku cakiran, oo ka dhigeysa wadatashiyada muhiimka ah ee bulshada, kormeerka, iyo sameynta nidaamyo ama habab lagu wajaho cabashooyinka.

Marka la eego nooca mashruuca, ee quseeya isku duwidda dhowr Waaxyo, Wasaarado iyo Hay'ado heer dhexe iyo heer degmo. Qaab dhismeedka baaxadda leh ee maareynta iyo soo tabinta warbixinnada, waxaa jirta baahi ah in lagu soo daro bulshada rayidka ah, isla markaana la xiriiriyo deeq bixiyayaasha, maxaa yeelay khatarta daneeyayaasha ee mashruucan waa mid weyn. Khatarta la xiriirta daneeyayaasha ee laga yaabo in ay dib u dhigaan ama joojiyaan howlaha oo laga yaabo in ay saameyn ku yeeshaan hirgelinta iyo dhamaystirka Mashruuca waa arin jirta ama waa mid la taaban karo.

Maamulka iyo Maaliyada oo dib loo habeeyo si guud iyo si gaar ah, iyo waliba nidaamka bixinta mushaarka shaqaalaha rayidka ah, oo dib loo habeeyo, waxaa ku jiri doona isbeddelo saameyn doona danaha daneeyayaasha. Waxaa jiri doona xaalado hal dhinac guuleysto dhanka kalana khasaaro, halkaasi oo danaha dhinacyada kala duwan aysan is qaadan doonin, ama mar daneeyayaashu, aysan awoodi doonin amase aysan aqbali doonin mowqifka guud. Sidaas awgeed, si loo yareeyo khatarahaas, mashruucu, wuxuu hirgaliyaa la shaqeyn joogto ah oo lala yeesho dhammaan daneeyayaasha iyo bulshada rayidka ah.

Fahamka awoodda iyo saameynta ay daneeyayaashu ku leeyihiin, waxay gacan ka geysan doontaa in la is waafajiyo sheegashadooda mashruuca. Intaa waxaa dheer, naqshadeynta mashruuca waxaa ku jiraya soo jiidashada jawaab celinta saxa ah ee muwaadinka.

**Qeexidda Mashruuca:**

Waddada guud ee loo marayo Mashruuca Saddexaad ee Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed (RCRFIII), waa sii socoshada qeybta  labaad ee Mashruuca kharashka joogtada ah iyo dib u habeynta maaliyadeed (RCRF II), laakiin waxaa lagu daray tallaaboyin dheeraad ah, oo lagu adkaynayo waddada loo maray, oo ay ka mid tahay xoojinta jawaab-celinta Cudurka Safmarka ah ee Covid-19 iyo kordhinta maalgelinta ee loo gudbinayo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka.

Saddexda qaybood ee waaweyn ee lagu hirgeliyay qeybta labaad ee Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed,  waa kuwo sii soconaya, magac ahaanna waa sidan: i) Kharashka soo noq noqday ee maalingelinta si is baddal loogu sameeyo hababka maareynta ilaha dhaqaalaha; ii) Xoojinta xiriirka maaliyadeed ee dowladaha, iyo iii) Wareejinta howlaha aasaasiga ah ee dowladda iyo habka waxbarashada aasaasiga ah iyo adeegyada caafimaadka ee Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka ee buuxiyay shuruudaha.

Ku biirinta/daridda aasaasiga ah, waxaa ka mid ah, marka hore, qeybta saddexaad ee Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed (RCRF III), wuxuu soo bandhigi doonaa Shuruudaha Ku Saleysan Waxqabadka si loo dhiirigeliyo dib-u-habeynta iyo maalgelinta la xiriirta Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah si loo horumariyo maamulka iyo bixinta adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka (Qeyb-hoosaadka 2.2).

Marka labaad, yaraynta  tirada jaangooynta dib-u-habeynta ee Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya (Qeyb-hoosaadka 1.2) laga bilaabo todoba sida hoos timaada Qeybta labaad ee Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo dib u Habeynta Maaliyadeed ilaa la soo gaarsiiyo Shan, ee hoos timaadda qeybta labaad ee Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed ee hoos timaada qeybta saddexaad Mashruuca kharashka joogtada ah iyo dib u habeynta maaliyadeed (Shuruudaha Ku Salaysan Waxqabadka), howlgalku, wuxuu abuuraa habab yar oo si fiican diirada loo saarayo,  oo ah dhiirigelinta dib u habeynta is beddelka gunnooyinka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Marka saddexaad, Mashruuca kharashka joogtada ah iyo dib u habeynta maaliyadeed ee saddexaad (RCRFIII), wuxuu bixin doonaa agabka xoojinta nidaamka dowladeed, oo ay ku jirto taageerada warbixinta maaliyadeed ee dowladaha hoose ee la hormariyay (Qeyb-hoosaadka 2.3).

Marka Afaraad, Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed qeybtiisa saddexaad, wuxuu taageeri doonaa isbeddelka habka maalgelinta kharashka soo noqnoqda ee qeybta waxbarashada.

Waxaa si tartiib tartiib ah looga guurayaa qeybta labaad ee Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed  ee habka maalgelinta mushaharka macalinka ee horay u jiray, waxaana loona guurayaa habka deeq bixinta ee ku saleysan waxqabadka wanaagsan ama bandhigga iskuulka (Qeyb-hoosaadka 3.2). Ugu dambayntii, qaybta saddexaad ee Mashruuca Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed, wuxuu soo bandhigaysaa qeyb cusub, oo ku saabsan Hufnaanta iyo Ka qeybgalka Muwaadinka ee Bixinta Adeegga horay loo mariyay, oo ay ku jiraan maalgelinta qiimeynta iyo saameynta.

**Ujeedka Qorshaha Howlgelinta Daneeyayaasha**

Heerarka tayo ee Bii'ada/Deegaan iyo Bulsho ee Bangiga Adduunka, waxay u baahan yihiin wadatashi bulsho, oo joogto ah, gaar ahaanna quseeya xogaha la saameeyay ama daneeyayaasha kale ee ku saabsan saameynta deegaan iyo midda bulsho ee mashruuca. Tan, waxaa laga leeyahay aragti ah in soo jeedinta iyo talooyinkooda lagu daro mashruuca, gaar ahaan bilowga hore marka mashruuca la naqshadaynayo.

Inta lagu guda jiro fulinta mashruuca, waxaa ku lug yeelan doona dad kala duwan ama daneeyayaal kala duwan. dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah ee ka qeybgalaya mashruuca, waxay mas'uul ka ahaan doonaan fulinta iyo maareynta mashruuca. Daneeyayaasha aan dowliga ahayn sida, hoggaamada bulshada, muwaadintiinta ee ka faa'iidaystay adeegyada la bixiyay, dhinacyada wada shaqeyntu ka dhaxayso, macallimiinta, shaqaalaha caafimaadka, xubnaha kooxaha laga tiro badan yahay, kooxaha tabarta daran iyo kuwa la heyb sooco, waxay si joogto ah uga qeyb qaadan doonaan mashruuca dhammaan inta uu socdo.

Dowladdu, waxay hubin doontaa ka-qeybgalka dhabta ah ee daneeyayaasha si loo dhiso is-aaminaadda laba dhinac, kobcinta xiriir hufan, oo lala yeesho ka faa'iidaystayaasha mashruuca iyo daneeyayaasha kale, iyo hubinta in la ogaado, lana yareeyo khatarta iyo saameynta bulshada iyo deegaanka. Soomaaliya gudaheeda, wadahadal joogto ah oo macno leh, oo lala yeesho daneeyayaasha ayaa muhiim u ah in la kordhiyo fursadaha muhiimka u ah guusha mashruuca, iyo in la hor mariyo aqbalaadda iyo lahaanshaha mashruuca iyo in la wanaajiyo heshiiska bulsho ee ka dhexeeya dowladda iyo muwaadiniinteeda.

Qorshaha Hawlgelinta Daneeyayaasha iyo ka qeybgalka muwaaddiniinta, waxaa loo hirgelin doonaa qaab kor loogu qaadayo la socodka khataraha bulsheed iyo deegaanka iyadoo la dejinayo filashada labada dhinac, caddaynta inta ay le'eg tahay ballanqaadyada iyo agabka dowladda, iyo helitaanka jawaab-celinta howlaha. Ugu dambeyntii, Qorshaha Howlgelinta Daneeyayaasha, waxaa ku jiri doona habka cabashada si loogu oggolaado dowladda in ay wax ka qabato cabashooyinka iyo soo jeedinta wanaajinta xilliga ku habboon.

**Aqoonsiga iyo Falanqeynta Daneeyaha**

Inta lagu gudo jiro waqtiga fulinta mashruucu, wuxuu la shaqeyn doonaa daneeyayaal tiro badan, oo qaybo kala duwan leh. Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah ee ka qeyb-qaadanaya, ayaa mas'uul ka noqon doona hirgelinta iyo maareynta mashruuca.

Daneeyayaasha aan dowliga ahayn sida hoggaanka bulshada, muwaadiniinta ka faa'iidaysta adeegyada la bixiyo, macallimiinta iyo shaqaalaha caafimaadka, xubnaha qabiilooyinka laga tirada badan yahay iyo kooxaha nugul iyo kuwa la takooro, ayaa si joogto ah uga qeyb qaadan doona dhammaan inta uu socdo mashruuca.

Kooxaha kale sida mac-hadyada tababarka macalimiinta, adeeg bixiyeyaasha caafimaadka iyo waxbarashada ee gaarka ah, iyo bulshada rayidka ah, ayaa la hawlgelin doonaa sida ku habboon. Xiriirka lala yeelanayo dhinacyada kale ee dowliga aheyn ee jira, oo ay ku jiraan hey'adaha Qaramada Midoobay, Ururada aan Dowliga aheyn (NGO-yada) iyo ururada ganacsiga ee gaarka loo leeyahay, ayaa sidoo kale la hirgelin doonaa si loo hubiyo in mashruucu awood u yeesho howlaha hey'adaha kale ee ku jira xayndaabka caafimaadka, waxbarashada iyo ka qeybgalka madaniga ah.

Tallaabo taxaddar iyo tixgelin wadata, ayaa la qaadi doonaa si loo hubiyo in haweenka, dhallinyarada, dadka waayeelka ah, dadka naafada ah, kooxaha laga tiro badan yahay iyo kooxaha danyarta ah ee Barakacayaasha, ay matalaad ku leeyihiin kooxaha daneeyayaasha ee shaqada wada.

Daneeyayaasha kala duwan ee kale, ee ay ku jiraan odayaasha dhaqanka, culimada saameynta ku yeelan kara fikirka iyo howlaha adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada iyo haweenka iyo kooxaha danyarta, ayaa ka qeyb gali doona mashruuca.

Iyadoo la doonayo ka qeyb gal ku habboon oo tayo leh, daneeyayaasha mashaariicda la hindisay, ayaa waxaa loo qeybin karaa qeybahan waaweyn ee hoos ku xusan:

**Dhinacyada saameynta lagu yeeshay**:

dadka, kooxaha iyo dhinacyada uu mashruucu saameynta ku leeyahay, kuwaasoo saameyntoodu tahay mid dhab ah iyo mid la fili karo, in ay u nugul yihiin is baddal la xiriira mashruuca, iyo kuwa u baahan in si dhow loola shaqeeyo si loo caddeeyo saameyntooda iyo muhiimaddda ay leeyihiin iyo sidoo kale go’aan gaaridda iyo yareynta khatarta, la wadaagidda faa’iidooyinka mashruuca, iyo tallaabooyinka maareynta.

a. **Kooxaha kale ee Daneynaya**: Shaqsiyaadka/kooxaha/hey’adaha, kuwaasoo aan saameyn toos ah ku laheyn mashruuca, balse u arka daneyntoodu in ay si uun saameyn ugu yeelanayaan mashruuca iyo/ ama kuwa si uun saameyn ugu yeelanaya wajiyada mashruuca iyo fulintiisaba; iyo
b. **Kooxaha Nugul:** Shakhsiyaadka uu mashruucu u saameeyay si aan isku dhigmin, ama uga sii daray mashruuca marka la barbar-dhigo kooxaha kale sababo la xiriira nugaylka xaaladdooda, taasoo u baahan karta dadaallo gaar ah, oo ka qeybgal si loo hubiyo matalaad dhab ah, oo loo siman yahay iyo ka qeybgalka habraaca wadatashiga iyo go'aan

qaadashada, oo ay ku jiraan ka faa'iidaysiga fursadaha faa'iidooyinka mashruuca. Iyadoo la eegayo duruufaha jira xubnaha kooxaha nugul, waxay noqon karaan dhinacyada ay khusayso ama cid kale oo danaynaysa.

**Xeeladaha ka qeybgalka Daneeyaha**

Dowladdu, waxay isku diyaarin doontaa  ka-qeybgalkeeda, iyadoo eegaysa hababka ugu waxtarka badan si loo gaaro daneeyayaasha la aqoonsaday, oo ay ku jiraan kooxaha danyarta ah. Si loo yareeyo kharashka loona kordhiyo saameynta iyo helitaanka daneeyayaasha, si dhow, ayaa loo hirgelin doonaa Qorshaha Hawlgelinta Daneeyayaasha, iyadoo la kaashanayo madasha ay ku kulmaan muwaadiniinta iyo in la dhiso lana xoojiyo qaab-dhismeedka ka-qeybgalka dowladda ee jira sida wada-hadallada Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ah.

Marka laga hadlayo heerka bulshada, isku-duwayaasha mashruuca ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubanaha ka ah Federaalka ee ka qeybgalaya, waxay dhisi doonaan isbahaysiga wakiilada isbeddelka iyo kormeerayaasha bulshada ama waxay la shaqeyn doonaan qaab-dhismeedka jira, iyagoo qaadanaya isgaarsiin kala duwan iyo habab ka qeybqaadasho, oo loo naqshadeeyay in lagu wargeliyo, lagula tashado, lagu lug yeesho, lala shaqeeyo, lana xoojiyo.

Kuwaas, waxaa ka mid noqon doona dadka nugul iyo kooxaha la heyb sooco sida barakacayaasha, kooxaha laga tirada badan yahay iyo qabaa'ilka, haweenka, iyo bulshooyinka fogfog, oo ay ku jiraan xoolo-dhaqatada reer guuraaga ah. Caqabadaha hortaagan ka qeyb galka kooxahan jilicsan awgeed, mashruucu, wuxuu si dhow ula shaqeyn doonaa hey'adaha u dooda in la helo adeeg hufan si loo hubiyo in aragtidooda la tixgaliyo, waxna laga qabto.

Si loo ballaariyo macaamiisha/dhagaystayaasha ololaha macluumaadka dadweynaha, mashruucu, wuxuu isticmaali doonaa farsamo waqti dheer, oo  isgaarsiineed oo  ku tiirsan dhagaystayaasha, tusaale ahaan raadiyaha, warbaahinta bulshada iyo doodaha talefishinka. Intaas waxaa weheliya, samaynta sahminta jawaabcelinta bulshada oo ah mid waqti salka ku haysa si loo helo aragtiyo ku saabsan saameynta bulsho iyo deegaan ee adeegyada uu bixiyo mashruuca iyo in la fahmo haddii ay jirto wacyiga Hababka Cabashooyinka in ay tahay mid la aamini karo oo shaqaynaysa.

Hababkan jawaab-celinta, waxaa ka mid noqon kara xarumaha wacitaanka iyo qoraallada fariimaha la isugu diro moobeelka si loo ballaariyo ka-qeybgalka bulshooyinka meesha ay tahay in laga fuliyo Mashruuca saddexaad ee Kharashka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed (RCRF III).

Waddan ay heerkiisa aqooneed iyo tignoolajiaddiisu xaddidan tahay, jawaabaha codadka horay loo sii duubay, waxay u ogolaadaan dadka ka faa'iidaysanaya mashruuca in uu dowladda siiyo jawaab deg deg ah, sahlan oo dhaqso ah.

**Ku biirin/darid/kordhin:**

Mashruucu, wuxuu fulin doonaa ka-qeybgalka daneeyayaasha ee bartilmaameedka u ah kooxaha nugul iyo kuwa danyarta ah iyo shakhsiyaadka si ay u fahmaan welwelkooda ama baahidooda xagga helitaanka macluumaadka, iyo adeegyada mashruuca iyo caqabadaha kale ee ay kala kulmaan guriga, goobaha shaqada iyo bulshooyinkooda.

Fiiro gaar ah, ayaa loo yeelan doonaa si loola shaqeeyo haweenka qaab isku xiran. Waxaa la tixgelin doonaa inta lagu gudo jiro fulinta mashruuca faahfaahinta qorshayaasha fog fog ee la qaadan doono si looga qeybgeliyo loolana xiriiro kooxaha nugul si wax-ku-ool ah.

Wasaaradda Maaliyaddu waxay qabanaysaa arimahan soo socda:

- Waxay fududaynsaa ka qeyb-gelin baaxad leh, oo ah in shaqsiyaadka iyo kooxaha danyarta ee leh matalaad ku filan oo jinsi, bulshada, odayaasha, culimada diinta, iyo ururada bulshada.
- Waxay siinaysaa shaqsiyaadka iyo kooxaha danyarta dhammaan macluumaadkii loo baahnaa ee ku saabsan mashruuca oo ay ku jiraan, saameynta xun ee la fili karo in uu yeesho.
- Waxay xaqiijinaysaa in la isticmaalay ama laga shaqaysiiyay hababki ugu fiicnaa wada xiriirka dadka ka dhexeeya, iyadoo mudnaan la siinayo dadka akhriskoodu hooseeyo, lahjadaha maxalliga ah, iyo caqabadaha wada xiriirka dadka ee Ururada Dadka Naafada ah.
- Waxay agaasimaysaa isla markaana qabanaysaa wada tashiyo, waliba u qaabeysan kuwo lagu hubinayo xoriyadda hadalka iyo in ay fikirkooda iyo dookhoodaba si xor ah u cabbiraan.
- Waxay diiwaan-gelinaysaa dhammaan kulamada wada hadallada ee shaqsiyaadka iyo kooxaha danyarta ah ee ku aaddan, waxay ka aaminsan yihiin shaqooyinka mashruuca iyo saameynta la xiriirta, gaar ahaan saameynta aan wanaagsaneyn.
- Waxay la wadaagaysaa fikradaha iyo fal-celinta ay bixiyeen dadka bartilmaameedka ah; iyo
- Waxay soo bandhigaysaa shuruudihii lagu heshiiyay ee ay ogolaadeen dadkii la tashiga lala sameeyay.

**Habka Cabashada:**

Habka ama nidaamyada cabashada, waxaa loo qaabeeyey in ay si deg deg ah oo daah-furan wax uga qabtaan tabashooyinka iyo cabashooyinka, iyadoo aan wax saameyn ah ku yeelanayn (kharashka, takoorka) warbixin kasta oo ay sameeyaan dadka mashruucu uu saameynta ku leeyahay. Ujeedada Habka Cabashada waa in la diiwaan-geliyo oo uu xalliyo wixii cabashooyin ah ee imaan kara marxaladda fulinta mashruuca iyo/ama arrimaha kale ee howlgalinta la xiriira ee ay suurtagalka tahay in la naqshadeeyo inta lagu jiro marxaladda fulinta.

Mashruucu, wuxuu yeelan doonaa dhowr waddo, oo loogu talogalay in la mariyo cabashooyinka iyo tabashooyinka, oo ay ku jiraan fariimaha (Email-ka), telefoonada, qoraalada iyo khadka telefoonka deg degga ah kuwaasoo heli doona dhammaan shaqaalaha, oo yeelan doona hab qarsoodi ah, oo ku habboon, oo wax looga qabto cabashooyinka la xiriira Xadgudubka Ka Faa'iidaysiga Galmada iyo/ama Dhibaataynta.

Macluumaadka ku saabsan Habka Cabashada ee mashruuca, waxaa la siin doonaa shaqaalaha dhammaan xarumaha, xafiisyada dowladda (labadaba heer qaran iyo heer maxalli ah) iyo heer bulsho (xarun caafimaad, tusaale ahaan) si loo hubiyo in dhammaan shaqaalaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha dadban sida Shaqaalaha Caafimaadka Dumarka ah in ay helaan macluumaad ku filan, oo ku saabsan sida loo xeraysto ama loo diiwaan-gashto cabasho iyo qofka ay tahay in loo gudbiyo cabashadaas.

Marka laga shaqaynayo hawlaha cabashada shaqaalaha, arinku wuxuu noqon doonaa mid qarsoodi ah, oo aan xogta iyo magacyada dadka la soo bandhigeyn. Inkastoo 'sanduuqyada soo jeedinta' ay ka jiraan goobo badan oo shaqo ayna u muuqdaan qaab la door biday, oo lagu soo gudbiyo, balse khibradda la helay, ayaa ah in ay adag tahay in santuuqyadaas la furo. Haddii ay tahay in kuwan loo isticmaalo qeyb ka mid ah Habka Wax ka qabashada Cabashooyinka, qaab dhismeed, ayaa loo baahan yahay in la dejiyo si loo furo, dib u eegis loogu sameeyo, looga jawaabo, loona bixiyo jawaab celin arrimaha la soo qaaday.

Waxa kale oo jiri doona hab u gaar ah cabashooyinka shaqaalaha, oo loogu talogalay in ay isticmaalaan dhammaan shaqaalaha tooska ah iyo kuwa qandaraaska haysta si ay shaqaaluhu tabashooyinkooda shaqada quseeya u soo gudbiyaan , iyadoo la raacayo qodobada Heerarka Tayo ee Deegaanka iyo Bulshada, qeybta labaad.

Wasaaradda Maaliyadda, ayaa mas'uul ka noqon doonta in ay la socoto xalinta dhammaan arrimaha la xiriira howlaha mashruuca, iyadoo la raacayo shuruucda u degsan Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo Bangiga Adduunka ee heer deegaan iyo bulsho, iyadoo loo marayo Habka Cabashooyinka ee sida cad loo qeexay, kaasoo bidhaaminaya hababkeeda, kaasoo ah mid marwalba ay daneeya-yaashu heli karaan, gaari karaanna.

Goobaha ay cabashooyinku kusoo dhacaan marka ugu horaysaba, waxaa joogi doona khabiirada arrimaha bulshada ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Waaxda Fulinta Mashaariicda Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka labadaba, kuwaasoo cabashada ku heli doona qaab taleefoon, fariin qoraaleed telefoonka gacanta ama Mobile-ka, fariimaha (Email-ka) ee heer Dowlad Federaal iyo Dowladaha xubnaha ka ah. Waxay aqoonsan doonaan, diiwaangelin doonaan, gudbin doonaan, la socon doonaan xallinta cabashada, oo ay u sheegi doonaan qofka cabanaya natiijada.

Madaxda Waaxda Fulinta Mashaariicda ee heer Dowlad Goboleed iyo Heer Dowlad Federaal, ayaa hubin doona in xallinta dhammaan cabashooyinka loo maray hab nidaamsan oo caddaalad ah. Qofka cabanayaa, wuxuu xaq u leeyahay in aan magiciisa la sheegin, haddii ay taasi dhacdo waa in aan la qorin tafaasiisha aqoonsigsiga qofkaas.

Tallaabooyinkan, ayaa sidoo kale la qaadi doonaa si loo hubiyo ilaalinta qofka xogta soo dusiyay. Cabashooyinka la xiriira mashruuca guud, waxaa wax ka qaban doona Wasaaradda Maaliyadda/Waaxda Fulinta Mashaariicda ee heer Dowlad Federaal iyo heer Dowlad Goboleed, si kastaba ha ahaatee kuwa ku saabsan bixinta adeegga caafimaadka ama waxbarashada, waxaa lagu xallin doonaa iyadoo lala kaashanayo wasaaradda ay khuseyso ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo/ama Dowlad Goboleedka. Khabiirka arrimaha bulshada ee Dowladda Federaalka, ayaa fulin doona tababarka saraakiisha bulshada ee Dowlad Goboleedka iyo saraakiisha mashruuca oo ay ku jiraan maareynta cabashooyinka iyo ka warbixinta cabashooyinka.

**Guddiga Xalinta Cabashada:**

Mashruucu, wuxuu leeyahay guddiga xallinta cabashooyinka heer Dowlad Goboleed iyo heer Dowlad Federaal oo uu guddoomin doono Maareeyaha Mashruuca, shaqaalaha Waaxda Fulinta Mashruuca ee ay khusayso, ayaa lagu dari doonaa hadba sida loo baahdo, iyadoo ku xiran cabashada (wax soo iibsiga, maaliyadda, Kormeerka iyo Qiimaynta, Tacadiyada Ku-salaysan Jinsiga iyo isgaarsiinta) iyo sidoo kale shaqaalaha ka socda Wasaaradaha Caafimaadka iyo Waxbarashada, ayaa lagu martiqaadi doonaa hadba sidii loogu baahdo.

Saraakiisha Badbaadada Bulshada, ayaa daadihin doona shirarka, waxayna dabagal ku sameyn doonaan habka xalinta cabashooyinka. Guddiga Xallinta Cabashooyinku, waxay u kulmi doonaan si bille ah, si ay dib ugu eegaan cabashooyinka yaryar, horumarka laga gaaray xallinta cabashooyinka, dib u eegista horumarinta iyo waxtarka habka cabashada, iyo hubinta in dhammaan shaqaalaha iyo bulshadu ay ka warqabaan nidaamka iyo mashruuca.

Shirar deg-deg ah, ayaa la qaban doonaa haddii ay dhacdo cabashooyin waaweyn, loona baahdo in wax laga qabto, heer Wasaarad Maaliyadeed/Waaxda Fulinta Mashruuca ahaan. Cabashooyinka daran ama sii khatarsan ee quseeya dhibaato soo gaartay dadka ama

deegaanka ama kuwa khatar ku noqon kara sumcadda mashruuca,  khabiirka arrimaha bulshada ee Dowlad Goboleedka, waa in uu isla markiiba u sheego khabiirka arrimaha bulshada ee Dowladda Federaalka ama  madaxa Waaxda Fulinta Mashaariicda,  kaasoo ku wargelin doona Bangiga Adduunka 48 saacadood gudahood. sida ku cad Shuruudaha Warbixinta Dhacdada Deegaanka iyo Bulshada (ESIRT).

## RCRF 3: WAKIILLADA CABASHOOYINKA IYO GUDDIYADA XALLINTA CABASHOOYINKA




**Heer tuulo:** qaybaha mashuuca ee ka howlgelaya heer tuulo, cabashooyinka, waxaa loo soo gudbin karaa wakiilka cabashooyinka.

**Habka Cabashada ee Mashruuca Kharasaadka Joogtada ah iyo Dib u Habeynta Maaliyadeed**

Cabashada, waxaa lagu soo diri karaa Email-lada soo socda:

1. Dowladda Federaalka Soomaaliya, Waaxda Fulinta Mashaariicda, Hababka Xallinta Cabashooyinka: **rcrfgrm@gmail.com**
2. Dowladda Federaalka Soomaliya, Xadgudubyada ku salaysan Jinsiga, Mashruuca kharasaadka joogtada ah iyo dib u habeynta maaliyadeed: **rcrfgenderunit@gmail.com**
3. Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed: **swssgrm@gmail.com**
4. Dowlad Goboleedka Jubbaland**:JL.RCRF.GRM@gmail.com**
5. Dowlad Goboleedka Hirshabelle :**Hssgrm@gmail.com**
6. Dowlad Goboleedka Puntland :**plrcrf.grm@gmail.com**
7. Dowlad Goboleedka Galmudug :**rcrf.grm.galmudug@gmail.com**

Dhammaan cabashoyinka, waxaa loola dhaqmi doonaa, loona xafidi doonaa qaab sir ah, haddii la codsado ama haddii ay jirto baahi ah in la ogaado aasaaska. Marnaba lama ogolaan doono in aargoosi lagula koco qofka cabaso soo gudbiyay. Tacaddiyada Ku-saleysan Jinsiga/Xadgudubka Ka Faa'iidaysiga Galmada iyo/ama Dhibaataynta, waxaa loola macaamili doonaa sida u sheego qofka cabanaya ama uu raalliga ka yahay qofka dacwadda soo gudbiyay.

Cabashooyinka, waxaa la macaamili doona khabiirka bulshada ee heer Dowlad goboleed iyo madaxa mashruuca (kaasoo qayb ka noqon doona Guddiga Xallinta Cabashooyinka haddii loo baahdo) ama loo wareejiyo Khabiirka DFS iyo Madaxa Mashruuca. Haddii aan la gaarin xal lagu qanacsan yahay, qofka cabashada qabaa, wuxuu si toos ah ugu gudbinayaa cabashadiisa xafiiska Bangiga Adduunka ee dalka oo cinwaankiisu yahay: **somalialert@worldbank.org**

**Dib ugu warbixinta daneeyayaasha**

Waxqabadka mashruuca ee lagu qiimeeyay howlaha kormeerka, ayaa dib loogu soo sheegi doonaa ama loogu soo warbixin doonaa daneeyayaasha iyo sidoo kale jawaabcelinta la waydiisan doonaa. Waaxda Fulinta Mashruuca, ayaa mas'uul ka ah in ay hubiso in dhammaan warbixinada lagu wadaagay hababka dadwaynaha ee kor lagu soo xusay.

Casharrada laga bartay kormeerku, waxay sidoo kale gacan ka geysan doonaan naqshadeynta mashruuc-hoosaadyada mustaqbalka iyo in lala wadaago dadka ay khusayso.